FAAFINTA RASMIGA

الرسمية الجريدة

# DAWLAD PUNTLAND EE SOOMALIA

لولاية أرض بونت الصومال

**Sanadka 16.5-aad. Garowe , 25 January, 2015** **Lam.1**

**Faafinta bil walba soo baxda** جريدة الشهرية

***Qaybt Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada Dawladda Puntland***

**Qiimuhu waa Sh.So 10,000 rukun walba . Sanadkii waa Sh.So 170,000 dalka gudihiisa, dalka dibaddiisa Sh.So 500,000 rukunka la waydiisto, waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilawdaa 1-da January. Qiimaha qoritaan F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa Sh.So 3,000, rukunka iyo qoritaanka waxaa la waydiistaa qeybta maamulka Faafinta rasmiga ah. Lacagta waxaa lagu bixinayaa xafiiska canshuuraha barriga ee wasaaradda maaliyadda.**

---

## TUSMADA

**Qaybta Koowaad**

**Ansxinta Siyaasadda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka Dawladda Putnland**

**Qaybta labaad**

**Xeer**

**Waxba ma leh**

**Qeybta Saddexaad**

Talooyin, Isgaarsiin, Ogaysiis, Iidheh IWM.

**Waxba ma leh**

***Sharci Lr .10. ee 25/01/2015, kuna saabsan ansixinta Siyaasadda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka Dawladda Puntland.***

**DAWLADDA PUNTLAND** ولاية بو نت لاند الصومال

**EE SOOMAALIYA**

**GOLAHA WAKIILADA** مجلس النواب

**Xafiiska Guddoomiyaha**

**Office of the Speaker**

---

***Ref:-* XGGW/DPL/02/2015** **Garoowe, Sabti** **Date:- 24/01/2015**

**Ku:- Madaxweynaha DPL** **Garoowe**

Ujeeddo:- **Ansixinta Siyaasadda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka Dawladda Puntland**

**Guddoommiyaha Golaha Wakiilladdu:-**

| | |
|---|---|
| MARKUU ARKAY:- | Dastuurka DPL qodobkiisa 64-aad |
| MARKUU ARKAY:- | Soo gudbinta Madaxweynaha ee Ref MW/DPS/ 823/2014 ee 04/11/2014 kuna saabsan Siyaasadda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka Puntland |
| MARKUU TIXGELIYEY:- | Baahida loo qabo Ansixinta Siyaasadda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka PL |
| MARKUU DHEGAYSTAY:- | Doodii iyo Go'aankii Golaha Wakiillada ku Ansixiyey 09/12/2014 Siyaaradda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka Puntland |

**WUXUU GUDDOOMIYEY:-**

1. Ansixinta Siyaasadda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka Puntland
2. Ansixinta Qoondada Maareynta iyo ka hortaga Masiibooyinka ee:-
   a. Dawladda dhexe boqolkiiba hal (1%)
   b. Dawladaha hoose boqolkiiba labo (2%)

Guddoomiyaha Golaha Wakiilada / Speaker of the House of Representatives / PUNTLAND STATE

**Md. Siciid Xasan Shire**

**Guddoomiyaha Golaha Wakiilada DPL.**

---

# PUNTLAND DISASTER MANAGEMENT POLICY

## Siyaasadda Maaraynta Waxyeellada Masiibooyinka ee Puntland

## Government of PuntlandSOMALIA

## Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Siyaasadda Maareynta Waxyeellada Masiibooyinka

ee Puntland ee la Ansixiyey December 2014

## Map of Puntland State of Somalia




© Puntlandgov.Net

# HADMA

## Tusmada Qoraalka

## SIYAASADDA MAARAYNTA WAXYEELLADA MASIIBOOYINKA

Contents


SIYAASADDA MAARAYNTA WAXYEELLADA MASIIBOOYINKA 3

SIYAASADDA MAARAYNTA MASIIBOOYINKA 4

GUUD MAR KOOBAN 4

QAYBTA 1AAD: HORDHAC 9

1.1 GOGOLDHIG 9

1.2 HAYKAL ARAGTIYEEDKA (CONCEPTUAL FRAME WORK) 10

1.3 BAAHIDA LOO QABO DEJINTA SIYAASAD CAD 11

QAYBTA II: SIYAASADDA MAARAYNTA MASIIBOOYINKA PUNTLAND 13

2.1 ASTAAMAHA MAAREYN MASIIBO OO WAX KU OOL AH WAA: 13

2.2. TIIRARKA SALDHIGGA U AH SIYAASADDA 13

2.3 HIMILADA SIYAADDAN 14

2.4 HADAFKA 14

2.5 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA 14

2.6 MABAADI'IDA GUUD 15

2.7 AKHLAAQIYAADKA SALDHIGGA U AH 16

QAYBTA III: QAABKA IYO ISTARAATIIJIYADA 17

3.1 MAARAYNTA WAXYELLADA MASIIBADA 17

3.2 HAWLAHA KA- HOR DHACDADA MASIIBADA 17

3.3. HAWLAHA WEJIGA WAX QABADKA / JAWAABIDDA 18

3.4. WEJIGA SOO KABASHADA IYO DIB-U-DHISKA 19

QAYBTA IV: SHURUUCDA IYO HAY'ADAHA 21

4.1. GOLAHA GURMADKA DEG DEGGA EE MAARAYNTA MASIIBOOYINKA (PDMC) 21

4.2 SHARCIYADDA SIYAASADA 21

4.3 HAYKALKA SHARCI 21

4.4 QAABDHISMEEDKA MAARAYNTA MASIIBOOYINKA (SOO JEEDIN) 22

QAYBTA V: DUMIDDA HANTIDA IYO ILAALINTA U QOOLLAANTA 27

5.1 MAALIYADDA 27

5.2. SHAQAALE IYO AGAB 27

5.3 ABBABULKA SAHAYDA IYO SAADKA 28

5.4 KAABAYAASHA 28

5.5 ISGAARSIINTA 28

QAYBTA VI: LA SOCODKA IYO QIIMAYNTA. 29

I. LA SOCODKA BARNAAMIJKA MAARAYNTA WAYEELLLAD MASIIBOOYINKA 29

II: QIIMAYNTA BARNNAMIJKA MAARAYNTA MASIIBOOYINKA 29

Annex I: Sharciga Asaaska HADMA

Annex II: Dawrka iyo Mus'uuliyada HADMA (Roles and Manadate of HADMA)

Annex III: Sawiradii Kullamadii lagu ansixiyey siyaasaddan heer Degmo, Gobol iyo Dowlad dhexe.

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYEED

## SIYAASADDA MAARAYNTA MASIIBOOYINKA

### GUUD MAR KOOBAN

Sannadihii ugu dambeeyey ee la soo dhaafay, waxa Puntland soo maray tiro la shegi karo oo masiibooyin ah oo ama kasoo jeeda dabeecadda amaba dad sababay. Masiibooyinkaas, waxa ay la xiriireen Abaaro, daadad, ayax, waxyeello deegaan iyo cudurrada faafa. Soo noqnoqoshada dhacdooyinka masiibooyinka iyo welwelka isasoo tarayey ee saamayntoodu iyo weliba halista weyn ee faracyada badan leh ee kala soo gudboonatay dadka nugulka ah iyo kaabayaasha kala duwan ayaa waxa ay si weyn usoo jiidatay dareenka dawladda Puntland iyo hay'adaha samafalkaba.

Sidaas awgeed, ayaa waxaa soo ifbaxday baahida deg degga ah ee loo qabo dejinta siyaasaddii qeexi lahayd ka hortagga iyo u darbanaanta masiibooyinka iyo weliba nidaamkii ay ku shaqeyn lahaayeen hay'adaha hawshaas fulin lahaa. **Dareenka assaasiga ah ee la qabaa waxa uu yahay in ka hortagga iyo u darbanaanta masiibooyinku ay laf-dhabar u yihiin xakamaynta halista ka dhalan karta aafada.**

Waxaan shaki ku jirin in haddii culayska la saaro ka hortagga masiibooyinka ay baajineyso kharaj badan oo ku bixi lahaa maareyntooda, ayna bad-baadinayso naf iyo mal ku waxyeellobi lahaa. Sidaas darted, waxaa lagama maarmaan noqotay in hoggaanka dalka la hordhigo faaiidada weyn ee ay leedahay ka hortagga iyo weliba in arrinta la dhex geliyo barnaamijyada horumarinta ee dalka. Haddaba, siyaasadda maaraynta waxyeellada masiibooyinka ee Puntland waxa ay ku qotontaa qaab-maarayneed masiibo oo isugu dheellitiran ka hortag, u darbanaan, khafiifin/yarayn iyo gurmad.

Ujeeddada guud ee siyaasaddu waxa ay tahay in la helo degaan badbaada, gagsanna kara (adkaysan kara) iyada oo loo marayo adeegsiga aqoonta iyo isweydaarsiga xogta la xiriirta ka hortagga iyo mareynta masiibooyinka heer kasta oo la joogo. Si taas looga soo dhalaalo siyaasaddani:

**a)** Waxa ay dhiirri gelineysaa in aqoonta la xiriirta ka hortagga iyo maaraynta masiibooyinka lagu daro manhajka waxbarashada toosan iyo tan dabanba ee dugsiyada dalka. Arrintaasi waxa ay dhinac, kor u qaadeysaa **ku baraarugsanaanta dadka ee dhanka masiibooyinka.** Dhanka kale, waxa ay suurto gelineysaa in go'aannada laga qaadanayo yareynta khataruhu noqdaan kuwa la mahadiyo.

**b)** Waxa ay arrimaha si gaar ah uga eegeysaa dhinaca jinsiga (Jenderka). Siyaasaddani, uma aragto haweenku in ay yihiin oo keliya kuwa ugu badan ee dhibtu kasoo gaarto masiibooyinka, waxa ayse kale oo u aqoonsan tahay in ay yihiin kuwa si xoog leh uga qayb qaata xasillonida iyo dhiirri gelinta xilliyada caalwaaga gurmadkana qayb weyn ka qaata.

**c)** Waxa ay dhiirigelineysaa in dhaqanka kahortagga masiibooyinka dugsiyada lagu barto, saxaafaddu culeyska saarto, ayna si joogta ah u xusulduubaan hay'adaha maaraynta masiibooyinku.

**d)** Waxa ay dhiirrigelineysaa in aqoonta soo jireenka ah looga faaiideysto saadaasha masiibooyinka, ka digiddooda iyo hawlaha gurmadka.

Siyaasdaani waxa ay ka kooban tahay 6 qaybood  oo lagu qeexayo wejiyada kala duwa ee wax laga qabanayo, hay'adaha hawsha fulinaya qaab-dhismeedkooda. Sidoo kale, waxa ay siyaasaddani suuradeyneysaa masuuliyadaha kala duwan ee cidda horseedka u noqondoonta, fursadaha maal iyo haykal la fudeeyey oo hawlaha lagula socdo laguna qiimeeyo.

Maaraynta waxyeellada masiibooyinka waa in loo adeegsadaa dhinacya badan, waana masuuliyadda dhinacyada kala duwan ee ay arrintu saamayso. Siyaasaddani waxa ay hageysaa dhammaan wejiyada kala duwan ee maaraynta masiibooyinka, waxa ayna waafaqsan tahay mabaadi'ida caalamiga ah ee maaraynta masiibooyinka ee kala ah:

- Isdhexgelinta maaraynta masiibooyinka iyo qorshaha horumarinta
- Wada shaqayn iyo isla socod wax ku ool ah
- Dhisidda tayada  waxqabad ee heerarka kala duwan
- Madaxbannaani iyo xaqsoor
- Oggolaansho sharci
- Dhaqaale lagu wado
- Kharaj wadaag

Maaraynta masiibadu waxa ay isugu jireysaa saddex (3) weji ama marxaladood oo kala ah:

I. Masiibada ka hor

II. Masiibada dhexdeeda

III. Masiibada kaddib

Waxaa loo baahan yahay dedaallada mideysan ee daneeyayaasha ama bahwadaagta Shaqadu (Stakeholders) ee hoos ku qorani in ay noqdaan kuwo mira dhala:

a. Golaha Maaraynta Masiibooyinka Puntland ee ku meelgaarka

b. HADMA

c. Degaannada dhibtu gaartey

d. Isutagga Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas ( ICRC, SRCS) iwm

e. Hay'daha horumarinta

f. Dawladda dhexe

g. Maamullada kala duwan ee Dawladda

h. Bulshada Rayadka ah

i. Ganacsatada

j. Culamada Diinta

HADMA ayaa qaadaneysa kaalinta xiriirinta ee dhammaan wejiyada kala duwan ee wax ka qabashada waxyeellada masiibooyinka iyada oo wakiil ka ah Xafiiska Madxweynaha. Daneeyayaasha kale waxa ay qaadan doonaan kaalimmada ama doorka loo igamado.

Dhinaca haykalka hay'adeed waxa ay siyaasaddani qeexeysaa: -

i. Qaab dhismeedka Golaha Maaraynta Masiibooyinka (GMM)/Puntland Disaster Management Council (PDMC) iyo qaabdhismeedyada hay'adaha kale ee maaraynta masiibooyinka ilaa heer gobol.

ii. Awoodaha iyo xilalka HADMA

iii. Dhaqaajinta qorshayaasha maaraynta masiibooyinka

Si maaraynta masiibooyinka loogu helo maaliyad haqabtiran, waxa ay siyaasaddani ku talineysaa in maaraynta waxyeellada masiibooyinka loo sameeyo ugu ***yaraan laba sanduuq maaliyadeed***; mid heer Puntland ah iyo mid heer degmo ah.

Siyaasaddani waxa ay soo jeedineysaa in la sameeyo sanduuq heer Puntland oo ay maamusho HADMA, go'aanka kama dambaysta ahna uu bixiyo Madaxweynaha Puntland iyadoo waafajineysa shuruucda iyo qawaaniinta la dejiyey ee Maamulka Maaliyadda Dawladda.

Sanduuqan waxaa la isugu geynayaa biirada Wasaaradda Maaliyadda, tabarruca ganacsatada, iyo shakhsiyaadka, Ururrada Rayadka ah iyo hay'adaha kaalmada bixiya.

***Siyaasaddani waxa ay soo jeedineysaa in miisaaniyad sannadeedka dawladda 1% HADMA looga qoondeeyo si wax loogu qabto dadka masiibadu tabaalayso xilliga ku habbon.***

Sidoo kale, siyaasaddani waxa ay ku talineysaa in la sameeyo sanduuq heer degmo ah oo lagu maamulo maaraynta Masiibooyinka wax ka qabashada heer degmo, dawladduna maaliyadda qaar u leexiso. ***Siyaasaddani waxa ay soo jeedineysaa in 2% dakhliga degmooyinka sanduuqaas loo gooyo.***

Diiwaan gelin iyo gacan ku hayn wax ku ool ah ayaa laga samaynayaa Xarunta HADMA iyo heer degmo Waxaa qiimayn lagu samaynayaa baahida tababbar ee ay qabaan dadka ka hawl gelaya maaraynta masiibooyinka si loo daboolo gol daloolooyinka xirfadeed iyo kuwa khibradeed. Sidoo kale waxa ay HADMA gacan ka geysaneysaa kor u qaadidda xirfadda ciidammada dhanka la dagaallanka masiibooyinka.

Diwangelinta hantida, qalabka iyo agabka kale ayaa iyadana la meelanayaa si loo ogaado qalabka iyo kaabayaasha kale ee la haysto iyo meesha ay ku sugan yihiin. Tani waxa ay sahleysaa daad gureynta

qalabka iyo in go.aan laga qaato daldaloollada jira sidii lagu buuxin lahaa iyo inta awooddu la haystaa le'egtahay.

Dhanka wacyi gelinta guud, Wasaaradda Waxbarashada waxaa laga taageeri doonaa in ay manhajka ku darto maaraynta masiibooyinka, iyo isbeddelka cimilada si wacyiga guud kor loogu qaado.

Maaddaama qalab iyo agab haqabtiran aan loo hayn maaraynta masiibooyinka, dhammaan qalabka la heli karo oo ay ku jiraan kuwa ay leeyihiin ciidammadu waa in loo diyaariyaa gurmadka masiibooyinka degdegga ah.

Sidoo kale, waxa ay siyaasaddani soo jeedinaysaa in la sameeyo shuruudaha lagu adeegsan karo qalabka iyo agabka gaarka loo leeyahay xilliga masiibooyinka dhacaan.

Si loo helo kayd saldhig u noqda gurmadka masiibooyinka, waxa ay siyaasaddani soo jeedinaysaa:

**i.** In la sameeyo bar kayd oo la dhigo cunto iyo agab si loo adeegsado gurmadka masiibooyinka.

**ii.** In la dhiso ama ladayactiro kaabayaasha horumarka sida suuqyada, dugsiyada, cusbataallada, Ceelasha biyaha iyo waddooyinka si gurmadka loogu adeegsado.

Siyaasadda maaraynta masiibooyinku waxa ay aqoonsan tahay in isgaarsiintu laf-dhabar u tahay maaraynta masiibooyinka haddii ay noqon lahayd ka-digidda qaddinka ah, gurmadka iyo haddii ay noqon lahayd dib uga soo kabashada, sidaas darted, waxa ay siyaasaddani soo jeedinaysaa in Shirkadaha Isgaarsiintu ay guramdka masiibooyinka u meeleyaan khadad isgaarsiin oo u gaar ah, kuwaas oo u furan shaqaale loo igmaday khadadkaas waxaa loogu talagelayaa in loo irkado marka khadadka kale go'aan.

Marka laga hadlaayo tallaabooyinka lagula soconayo barnaamijka maaraynta masiibooyinka, siyaasaddani waxa ay tilammameysaa:

Dejinta nidaam ka digitaan qaddiman oo kala duwan oo ay yeeshaan noocyada kala jaadka ah ee masiibooyinka (sida abaaraha, daadadka, dabka. Duufaanta iwm):

1. Iyada oo la dejinayo calaamado laysla waafaqay
2. Kulammo, dibu eegid iyo falanqayn
3. Diiwaan gelin xaaladaha iyo waxa ka dhasha:
    a. Daneeyayaasha oo si joogto ah warka loola wadaago
    b. Qorsheyn maaliyadeed iyo gurmad
    c. Dejinta nidaamka la socod hawleed iyo in nidaamkaas la dabbaqo
    d. Dejin tusmo dibu eegid dhammaan meelaha mudnaanta la siiyey
    e. Dhidbidda nidaam xog ururin oo loo adeegsado maaraynta dhibta masiibooyinka.
    f. Dejin nidaam warbixin lagu siiyo heerarka kala korreeya ee maamulka
    g. Samaynta hantidhawr bulshadeed (Social auditing), iyo baaritaanno lagu sameeyo masiibooyinku sida ay u dhaceen iyo sidii loogu hawlgalay

Ugu dambayn waxa ay siyaasaddani culayska saareysaa qiimayn joogta ah oo lagu sameeyo sida ay u fulaan barnaamijyada maaraynta masiibooyinka iyadoo diiradda la saarayo dib-u-eegista iyo qiimaynta nidaamka ka digitaanka qaddiman gaar ahaan:

- Dib-u-eegis lix biloodle ah oo lagu eego habboonaanshaha digitaanka la adeegsaday ama degsan. Waxaa dib-u-eegista lagu darayaa xaaladda caalamka markaas ka jirta iyo saamaynta ay ku yeelan karto Puntland.
- Dibu eegis heer qaran iyo her IGAD ah

Qiimaynta sidii loo maareyey masiibooyinkii dhacay gaar ahaan:

- Dib u eegis barnaamijeed oo sannadle ah ee heer qaran iyo heer goboleed oo si qoto dheer arrinta loogu faaqido iyo soosaarid warbixin sannadeed.
- Qiimayn dhexe 30 -36 bilood fulinta ka dib si loo eego ka soo kabashada
- Qiimayn kama dambays ah dhammaadka fulinta iyo samaynta istaratiijiya cusub

..Siyaasaddan waxaa soo diyaarinteeda lagala tashaday kana qaybqaatay xubno ka socda qaybaha kala duwan ee maamulka dawladda Puntland sida:

1. Maamulka degmooyinka iyo Gobollada Puntland oo dhan.
2. Xubno ka tirsan Golaha Xukuumadda iyo Golaha Shacabka
3. Qaybo ka mida Hey'adaha Calaamiga ah iyo kuwa Maxaalliga ah

Waxaa Aqoon isweydaarsiyo badan oo sanooyin socday oo lagu casumay dadka ka qaybqaatay diyaarinta Siyaasaddan kharajkooda bixisay Hey'adda UNICEF iyo UNOCHA oo bixisay khabiirkii u horreyey ee daraafka kowaad qoray.

**Warqaad-siyaasadeedani,** waxa ay ku tuun tuunsaneysaa in qaabka ka hortagga masiibooyinku noqodo mid dhinacya badan laga eegay xilliga dheerna ku salaysan. In aqoon loo yeesho saadaalinta iyo ogaanshaha masoobooyinka soo fool leh, waxa ay lama huraan u yihiin go'aan qaadasho dhab ah, darbanaan iyo wax qabad la mahadin karo. Qaabku waa inuu noqdaa mid isku xiraya dedaalka dhammaan qaybaha ay arrintu khuseyso sida Dawladda, laamaha UNka, NGOyada, Qaaran-bixiyayaasha iyo bulshada degaanka ku nool.

## Qaybta I: HORDHAC

### 1.1 GOGOLDHIG

Dawladda Soomaaliyeed ee Puntlatlad waxa ay Joqraafi ahaan ku taal Waqooyi-Bari ee Soomaaliya. Waxa ay xad la-leedahay: dhinaca Waqooyi-Galbeed waxaa ka xiga Gobolka Togdheer, Waqooyiga waxaa ka xiga Gacanka Cadmeed, Koonfur-Bari waxaa ka jira Badweynta Hindiya, Koonfurta waxa ka xiga Gobollada Bartamaha Soomaliya, Galbeedna waxa ay xad kala leedahay kiilkisa shanaad ee Soomaalida dalka Itoobiya. Isuygeynta bedka dhulka Puntland waa 212,510 km2 (qiyaastii saddex meelood meel Bedka guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya), tirada dadka ku noolna waxa lagu qiyaasaa 3.9 malyan; Puntland waxa ay kamid tahay dhulka oomanaha ah ee Saaxilka Afrika.

Aqoonsiga ah in khataraha deegaan ee masiibooyinka ka dhashaa ay keeni karaan khasaare dhaqan-dhaqaale ama bulsho iyo mid nafeedba, waxa ay mar kale diiradda saartay qorshaynta iyo maaraynta masiibooyinka caqabado assaasi ah oo la xiriira sidii lagu yareyn lahaa waxyeellada ka dhalata. Qaar kamida caqabadahu nuxur ahaan waa kuwo horumar la'aan kayimi waayo waxa ay kasoo jeedaan ku guul darraysi xagga horumarka.

Qoraallo xiriir ah oo ay soo saartay Qarammada Midoobay iyo dib-u-habayn badan ayaa xoojinaya qorshaha maaraynta waxyellada masiibooyinka. Siyaasadahaas waxaa ka mid ah qoraalka ISDR 2002 oo cinwaankiisu yahay la noolaanta khataraha, Dib-u-eegidda caalamiga ee yareynta khatarta masiibooyinka. Qoraalkaas ka hor Golaha Guud ee Qarammada Midoobay waxa ay 1990-1999 ugu magac dartay toban sannad-lihii caalamiga ahaa ee yareynta waxyeellada masiibooyinka ee heer qaran.

Sannakii 2000, waxa ay dhidibtay ururka ISDR ( International strategy for Disaster Management) oo ka kooban dawladaha caalamka, hay'daha Qarammada Midoobay, urur goboleedyo, iyo Ururro Bulshada rayadka ah. Sannadkii 2005, waxaa dib-u-habeyn lagu sameeyey nidaamka UNka, taas oo dhalisay in UNDP da loo hawl geliyo hab ay kor ugu qaadi karto barnaamijyada wax ka qabashada masiibooyinka ee heerka dal. Iyada oo raacaysa jaantuska waddada fulinta ee baaqa kun-sanadlaha (Millennium), sidoo kale wuxuu hoos ugu daadegayaa meelo la xiriira u nuglaanshaha masiibooyinka dabiiciga ah sida deegaanka oo khalkhalka laga ilaaliyo, baabi'nta saboolnimada, macaluusha iyo kor u qaadista sinnaanta bani-aadamka (jinsiga).

Intaas waxaa iyana barbar socday in UN ka, NGOyada iyo tiro dawlada ahi ay horsed u noqdeen arrimaha la xiriira yareynta waxyeellada masiibooyinka. Arrimahaas waxaa ka mid ahaa haykalkii Hyogo (Hyogo framework) ee 2005- 2015 taasoo lagu dejiyey qaab dhammeystiran oo wax looga qaban karo welelka caalamiga ah ee ka taagan waxyeellada masiibooyinka bulshada ku dhaca. Dhinaca kale waxaa xusid mudan in Bangiga Adduunkuna uu sannadkii 2000 daaha ka furay ururka laga magac baxay 'Pro Vention' kaasoo ka shaqeeya in ganacsatada iyo bulshada rayadka ahi ay si wax ku ool ah uga wada hadlaan halista masiibooyinka si loo yareeyo waxyeelladooda.

Mid kamid ah caqabadaha ugu waaweyn ee muddo haystay maaraynta waxyeellada masiibooyinku waxa ay ahayd sidii loo heli lahaa qaab dhammeystiran oo waxyeellada masiibooyinka looga jawaabo. Dooddu hadda waxa ay tahay in laga tago hawlgalka samatabixinta, loona dhaqaaqo dhanka ka hor tagga iyo u darbanaanta masiibooyinka inta aanay dhicin. Isbeddelkan aragtida cusub waxaa sababay dhibaatooyinka ballaaran ee waayadan dambe masiibooyinku keenaan ee dunida ku habsaday, marka laga eego dhinaca dadka ay naftooda galaaftaan iyo burbrurka dhaqaale iyo hantida ee ka dhasha Leexashada loo leexday sanooyinkan dambe sidii loo yarayn lahaa loogana hortegi lahaa waxyeellada masiibada waxa sababay khasaarooyinka xad-dhaafka ah oo naf iyo maalba leh oo ay gaarsiinayso bulshada. Hase yeeshee, weli siyaabaha la adeegsadaa waxa ay culayska saaraan in masiibooyinka la wajaho hadba marka ay dhacaan iyo meesha ay ka dhacaan iyadoo daawada loo arko in kaalmo bini-aadane loo fidiyo cidda ay waxyeelladu gaartay. Habkani waxa uu yareyaa dhibaatada muddada dhow, waxaase laga maarmaan ah in la helo nidaam buuxa oo lagu dhiso tayada wax qabad ee jirta ee heer qaran iyo maxalliba ah.

**Warqaad-siyaasadeedani,** waxa ay ku tuun tuunsaneysaa in qaabka ka hortagga masiibooyinku noqodo mid dhinacya badan laga eegay xilliga dheerna ku salaysan ee heer Puntland. In aqoon loo yeesho saadaalinta iyo ogaanshaha masoobooyinka soo fool leh, waxa ay lama huraan u yihiin go'aan qaadasho dhab ah, darbanaan iyo wax qabad la mahadin karo. Qaabku waa in uu noqdaa mid isku xiraya dedaalka dhammaan qaybaha ay arrintu khuseyso sida Dawladda, laamaha UNka, NGOyada, qaaraan-bixiyaasha iyo bulshada degaanka ku nool.

## 1.2 Haykal Aragtiyeedka (Conceptual Frame work)

Masiibo waxaa lagu qeexaa "dhacda la xiriirta waxyeello dabiici ah, mid dad falkiyeen ama mid isku dhafan oo deg deg u dhacday taas oo sababatay burbur ku dhaca sida ay bulshadu u negayd ama habnololeedkeeda wax ka beddela, keenana in dad, duunyo iyo degaanba si baaxad leh ku waxyeelloobaan, wax ka qabashadeeduna ka badan tahay awoodda ummadda wax gaareen."

Masiibooyinka waxaa lagu dhawaaqaa marka maareynteedu dhaafto kartida iyo mugga bulshada waxyeelloowdey ama hay'adda dawladda, ayna u baahato in si wadajira loogu istaago wax ka qabashadeeda, haddii ay noqon lahayd dawladdas ama ay kaalmo heer caalami ah weyddiisan lahayd.

Baaxadda saamaynta waxyeellada masiibadu waxa ay ku xiran tahay heerka nuglaanshaha dadka waxyeelloobay, gagsiga dadka iyo awoodaha kasoo kabasho ee dadkaasi haystaan inta ay le'egtahay. Heerka adkeysiga dadka, xaaladaha dhaqan-dhaqaale ee jira ama hantidooda. **Sidaas darted, waxa ay fansaar la leedahay saboolnimada, xaaladaha jira ee siyaasadda, arrimaha bulshada iyo dhaqaalaha intaba.**

Guud ahaan, masiibooyinka waxa ay ku dhacaan dadka awalba nuglaa taasoo ka dhalatay farqiga heerka nolosha ee bulshadaas u dhexeya marka laga hadlayo hantida, gacan ku haynta khayraadka iyo xukunka.

Siyaasadda iyo dhaqaalaha ayaa kaalin muhim ka qaata dhacdada masiibooyinka. Haddaba, maaraynta dhabta ah ee waxyeellada Masiibooyinka waxaa lagu gaari karaa iyada oo wax laga beddelo arrimaha

bulshada, dhaqaalaha iyo siyaasadda guud. Isbeddelku waa inuu xushan yahay guntin kasta oo ka mid ah silsiladda u-darbanaanta, ka-jawaabidda, yaraynta waxyeellada, dib-u-daryeelidda iyo ka hortagga sida ka muuqata sawirka wareegga maaraynta masiibooyinka ee soosocda:




Figure 1

## 1.3 BAAHIDA LOO QABO DEJINTA SIYAASAD CAD

Marka dib loo jalleeco masiibooyinkii Puntland soo maray, waxaa muuqatay in dawladdu intii tabarteeda ah ku dedaalaysay sidii ay ku abuuri lahayd qaab wax lagaga qabto wixii dhacay ama dhaca. Saddexdii massibo ee isku sanadka ka dhacay ee ay ka mid ahayd Sunaamigu marka ay dhaceen kaddib, lana qaaday hawlgalkii weynaa ee samatabixinta dadkii ku waxyeellobay.

Xukuumadda Puntland waxa ay samaysay guddi deg deg ah oo masuul looga dhigay in ay maareeyaan waxyelladii masiibooyinkii kala duwanaa ee dalka ku habsaday sanadkaas. Hase yeeshee, inkasta oo laysku deyayey in si mideysan loo wada shaqeeyo haddana waxaa caado noqotay in wasaaradahu sidoodii mid waliba gaarkeeda ugu hawl gasho wax ka qabashada masiibooyinka. Taasi waxa ay keentay isku dul dhac wax-qabad, dayac, beekhaamin la’aan iyo weliba jiitan hawl-fulineed.

Si haddaba arrimahaas loo soo ururiyo, waxaa sannadkii 2005tii bishii Maarso la asaasay Hay'adda Maaraynta Waxyeellada Masiibooyinka (HADMA) oo hoos imaaneysa Xafiiska Madaxweynaha. ***Taas macneheedu waxa ay tahay in dhammaan hawlihii maaraynta masiibooyinka iyo xiriirintoodaba ay yeelaneyso Madaxtooyada Puntland iyada oo adeegsanaysa Hey'adda HADMA.***

Dejinta siyaasaddan waxaa looga gol leeyahay in xal loo helo dhaliilao badan oo lagu arkay nidaamka Maaraynta wax ka qabashada Masiibooyinka Puntland muddadii hey'addu dhisnayd gaar ahaan:

i. Jiritaan la'aanta siyaasad lagu hago maaraynta masiibooyinka iyo habraac la isku waafaqsan yahay'.

ii. Jiritaan la'aanta haykal sharci oo xalaaleeya, kala duwa awoodda hawl-gallada waxyeellada masiibooyinka.

iii. Saamaynta siyaasad qofeysan taasoo dhibaato ku haysa in lagu kalsoonaando barnaamijyada wax ka qabashada waxyeellada, marmarna caqabad ku ah fulintooda;

iv. Habka xiriirinta oo aan tifaftirnayn taasoo sababta hal hawl oo laba hay'adood ama in ka badan wada qorashaystaan wax ka qabashadeda.

v. Jiritaan la'aan xog lagu kalsoonaan karo ee khataraha, nuglaanta iyo awoodda hantida la heli karo marka wax dhacaan.

vi. HADMA oo aan doorkeeda sharciyadeed laysku waafaqsaneyn taas oo majaxaabisa in masiibooyinka looga jawaabo si wax ku ool ah oo aan dib u dhicid lahayn.

vii. Hey'adaha Caalamiga ah oo siyaasaddooda ku dhaqa wax ka qabashada waxyeellada masiibada madama aanaey jirin mid Puntland u degsan, loona sahlo in ay tooda wataan.

## Qaybta II: SIYAASADDA MAARAYNTA MASIIBOOYINKA PUNTLAND

### 2.1 ASTAAMAHA MAAREYN MASIIBO OO WAX KU OOL AH WAA:

2.1.1 **Amar bixinta shaqada:** Qaab dhismeedka hay'adda waa inuu si cad u qeexaa awoodaha iyo masuuliyadaha, jaranjarada amarka ee dhammaan wejiyada hawlgallada masiibooyinka waayo waxaa laga yaabaa in hay'adaha dawladda iyo dhinacya kale ay u hawlgalaan si awood tooxsi ah.

2.1.2 **Habraaca maaraynta waxyeellada masiibooyinka:** Hawlaha maaraynta deg degga ah waa in ay ka mid noqdaan hawlaha maalin-laha ah ee dawladda ee aanay noqon wax lagu baraarugo marka ay wax dhacaan taasina waxa ay ku imaanaysa xog ururin joogta ah iyo u tooga hayn.

*2.1.3* **in looga wajaho dhibaatooyinka qaab mideysan:** *Qaab-dhismeedka maaraynta Waxyeellada masiibooyinka iyo qorshohoodaba waa in loo dejiyaa si ku aaddan noocyada kala duwan ee masiibooyinka dhici kara iyo sida ay jawaab uga bixin karaan. Taasi waxa ay kor u qaadeysaa awoodaha jira, waxa ayna dhiirrigelineysaa ka qayb qaadashada dadweynaha.*

**2.1.4** **Dhiirrigelin kaqayb-qaadasho:** *Waa in ay siyaasadda dawladdu dadka iyo ururrada ku dhiirrigelin kartaa ka qayb qaadashada xaaladaha deg degga ah marka ay soo kordhaan iyo u tooga hayntooda.*

***2.1.5*** **Xiriirin adag oo ka dhexeeya dhinacyada ka qaybqaata:** *Maaraynta waxyeellada masiibooyinku waa masuuliyad wadareed, mana aha hawl dawladda keliya u taal. Sidaas darted, waxa lagama maarmaan ah in qaab-dhismeedka hay'addu muujiyo awoodda sharciyadeedd iyo shaqsiyaadka ama hay'adaha kala duwan ee isu dumaya khayraadka loo baahan yahay ee ka baxsan dawladda maxalliga ah.*

***2.1.6*** **Ka-digidda masiibooyinka oo la xoojiyo:** *Qaab-dhismeedka waa in lagu daraa xilalka qaybta ka-digidda masiibooyinka cid lagula xisaabtamana loo xilsaaro. Qaybtani waa in ay u hawlgashaa ka digidda dhammaan masiibooyinka iman kara. Waxaa kale oo loo baahan yahay in la dejiyo hab loogu digi karo dadka naafada ah iyo dadka aan af-Soomaaliga ku hadlin ee meeshaa deggan haddii ay jiraan.*

### 2.2. Tiirarka saldhigga u ah Siyaasadda

**2.2.1** Madaxweynaha Puntland ayaa caddaynaya ama ku dhawaaqaya in masiibo dhacday iyo meesha ay wax yeeshay, wuxuuna soo saarayaa qayladhaan isagoo la tashaday hey'adda u xilsaaran (HADMA) iyo Golaha Wasiirrada.

**2.2.2** Waxaa la dhisayaa Golaha Maaraynta Masiibooyinka Puntland ee uu guddoomiyo madaxweynaha ama ciddii uu u igmado. Goluhu wuxuu si guud masuul uga noqonayaa maaraynta waxyeelllada masiibooyinka si ku meelgaar ah.

**2.2.3** HADMA ayaa toos masuul uga ah fulinta dhammaan hawlaha wareegga maaraynta waxyellada masiibooyinka iyada oo ay kala shaqaynayaan madaxda maamullada iyo hey'adaha ay khuseyso.

**2.2.4** HADMA iyo maamullada maxalliga ah (Guddoomiyayaasha Gobollada, Duqowda Degmooyinka) waxaa la siinayaa awoodo gaara oo ay kula tacaalaan xaaladaha deg degga ah ee ka dhasha masiibooyinka. Dawladda dhexe waxa ay fududeyneysaa dumidda khayraadka ku baxaya samatabixinta.

**2.2.5** Waxaa xiriir adag laga dhex abuurayaa HADMA, Wasaaradaha, Maamullada dawladaha hoose, hay'adaha Caalamiga ah, Ururrada rayadka ah, ganacasatada, dadweynaha si ay xogta isu-weydaarsadaan, tayaduna u kororto.

## 2.3 HIMILADA SIYAASADDAN

In la dhiso Puntland ka badbaadsan una adkeysan karta masiibooyinka iyada oo la dejinayo Hannaan dhammeystiran, masiiba kastana ka jawaabi karta, loona abuurayo dhaqan isugu jira ka hortag, yarayn, u darbanaan iyo wax ka qabasho.

## 2.4 HADAFKA

Hadafka guud ee siyaasaddani waxa weeye bulsho badbaadsan, adkeysanna u leh haddi masiibu ku dhacdo iyada oo sare loo qaadayo adeegsiga aqoonta iyo xogta ka hortagga iyo maaraynta waxyeellada masiibooyinka heerarka kala duwan ee bulshada.

## 2.5 UJEEDDOOYINKA SIYAASADDA

**2.5.1** Dhiirrigelinta ka hortagga, u Darbanaanta iyo u gagsiga masiibooyinka heer kasta iyada oo loo marayo aqoon la xiriirta wax ka qabashadeeda.

**2.5.2** Mideynta istaraatiijiyada iyo dejinta siyaasado iyo qorshe sii socon kara waqtiga dheer.

**2.5.3** Dejinta hay'adahii iyo haykalkii sharci ee hawsha lagu wadi lahaa.

**2.5.4** Dejinta saadaal iyo nidaam ka-digitaan oo casri ah oo ay baritaarayaan khadad warhelid laysku hallayn karo leh (ICT).

**2.5.5** Hubinta wax ka qabashada masiibo oo si degdeg ah lagu fuliyo, dadka nugulna tixgelisa.

## 2.6 MABAADI'IDA GUUD

Maaraynta masiibooyinka waa in loo adeegsadaa dhinacya badan waana masuuliyadda dhinacyada kala duwan ee ay arrintu saamayso. Siyaasaddani waxa ay hagaysaa dhammaan wejiyada kala duwan ee maaraynta waxyellada masiibooyinka, ***waxa ayna waafaqsan tahay mabaadi'ida caalamiga ah ee maaraynta masiibooyinka.***

**2.6.1 Isdhexgelinta maaraynta waxyeellada masiibooyinka iyo qorshaha horumarinta:** ujeeddooyinka Siyaasadda maaraynta waxyeellada masiibooyinka waxaa la dhexgelinayaa oo lagu darayaa hadafka guud ee horumarinta dhaqaalaha iyo tan bulshada ee Puntland, waxa ayna ka mid noqoneysaa qorshaha muddada dhexe iyo xilliga fog ee dalka.

**2.6.2 Wada shaqeyn iyo isla socod wax ku ool ah:** Waxaa diiradda la saarayaa dejinta farsamo lagu xaqiijiyo in la helo wax ka qabad masiibo oo deg deg ah, mideysan dhammanna laga wada qayb qaato iyada oo ay ku jirto cidda masiibadu haleeshay.

**2.6.3 Dhisidda tayada:** Dawladdu waxa ay aqoonsan tahay in kor loo qaado mugga aqoonta maaraynta waxyeellada masiibooyinka ee hay'adaha dawladda kala duwan, NGOyada maxalliga ah, ganacsatada iyo degaannada si loo abuuro maarayn iyo gagsi wax ku ool ah. Waxaa lagama maarmaan ah in dadka nugul oo dhammi ogaadaan xaaladdooda si loo yareeyo saamaynta masiibooyinka.

**2.6.4 Madaxbannaani iyo Xaqsoor:** waxyeellada masiibooyinku waxa ay saamaysaa lagana dareemaa dhaqaalaha iyo bulshada. Sidaas darted, si dedaalladu u noqdaan kuwo dhedhxaad ah oo aan cidna faquuqayn, waa in hay'adaha maaraynta waxyeellada masiibooyinku yeeshaan madax bannaani ay ku gaari karaan xaqsoor cilmi ku fadhiya.

**2.6.5 Oggolaansho sharci:** Hay'adaha iyo shaqsiyaadka ka shaqaynaya fulinta hawlaha maaraynta waxyeellada masiibooyinku waa in ay helaan oggolaanshaha sharci ee ay u baahan yihiin si dhammaan daneeyayaashu u aqoonsadaan.

**2.6.6 Dhaqaale:** GMMP Waxa ay u ololeysaa in la qoondeeyo hanti lagu wado maaraynta waxyeellada masiibooyinka si jawaab dedeg ah looga bixiyo marka ay wax dhacan.

**2.6.7 Kharaj wadaag:** si joogto ah uma qaadi karto dawladda Puntland culeyska dhaqaale ee dhammaan kharajka ku baxaya dhibta dhacda ama in ay samayso dibudhiska muddada dheer. Qorshaha muddada dheer waxa ay tahay in la helo qaab cawil celin ah oo qorshaysan oo hore loogu talo galay ama loo qorsheeyey.

**2.6.8 Horumarinta, iyo xog-isdhaafsiga:** waxaa la yagleelayaa xarun u gaar ah qabashada daraasadaha, horumarinta iyo tabarrada la xiriira maaraynta waxyeellada masiibooyinka. Sidoo kale aragtida assaasiga ah ee la xiriirta maaraynta masiibooyinka waxaa lagu dhigi doonaa dugsiyada, jaamacadaha iyo Mac-hadyada tababarrada.

## 2.7 AKHLAAQIYAADKA SALDHIGGA U AH

2.7.1. **Samafalku waa waajib**: in qofka loo samafalo isna sameeyo samafal waxa ay ka mid tahay mabda' asaasiga ee binu-aadaminimo iyo kan islamka oo ay tahay in muwaadiniinta Puntland oo dhammi helaan samafal haddii wax ku dhacaan ama gargaar bixiyaan.

2.7.2 **Gargaar loo siman yahay**: gargaarka waa in loo sinnaadaa, mudnaantuna ahaataa sida dhibaatada loogu kala badan yahay oo keliya.

2.7.3 **Dhawritaanka xuquuqda assaasiga ee loo gargaaraha:** dadka dhibtu ku dhacday waxa waajib ah in la dhawro xuquuqdooda, lana xurmeeyo waxaana ka mid ah:

- ✓ Badbaadin ama daryeel,
- ✓ In laga dhigaysto dhibta ay sheeganayaan
- ✓ In lala tashado marka wax loo qabanayo
- ✓ Helitaan kaalmo ay u qalmaan.

2.7.4 **Wadaagidda warka iyo wacaasha**: qofkasta oo qiimayn ku sameeya khatar meel ka taagan ama ku soo aaddan waa in uu warka u sheegaa dadka meesha ku sugan.

2.7.5 **Wadaagidda xogta:** kooxaha ururiya baahida iyo mala awaalka masiibada waa in ay la wadaagaan dhammaan daneeyayaasha oo dhan si loo baajiyo xog ururin kale, iyo isdulfuul gargaar.

2.7.6 **Ka hortagga isbarbar yaaca:** waxaa akhlaaqiyan ama nidaam ahaan looga baahan yahay dhammaan hay'daha ka qayb-qaadanaya hawlaha gurmadaka masiibooyinka in ay u shaqeeyaan is buuxda, hagajiyaan wada shaqaynta dhexdooda, iyaga iyo dawladaha hoose, layskana ilaaliyo is barbaryaaca. Taas waxaa lagu hirgelin karaa:

- ➢ In la joojiyo ku tartanka gurracan ee mashaariicda,
- ➢ In la joojiyo in la kala u gaarsado shaqaalaha oo loo kala yeerto
- ➢ In aan la adeegsan muuqaallo iyo xog buun buunsan si loogu helo mashaariic ama maalgelin.
- ➢ In xogta lala wadaago cidda arrintu khuseyso oo dhan.
- ➢ In aan laga hor iman xiriirinta dawladda.
- ➢ In taageerada lays weydaarsado.

## QAYBTA III: QAABKA IYO ISTARAATIIJIYADA

### 3.1 MAARAYNTA WAXYELLADA MASIIBADA

Maaraynta masiibadu waxa ay isugu jireysaa Saddex (3) weji:

I. Masiibada ka hor

II. Masiibada dhexdeeda

III. Masiibada kaddib

Waxaa kale oo loo baahan yahay dedaallada mideysan ee daneeyayaasha hoos ku qoran:

1. Golaha Maaraynta Masiibooyinka Puntland
2. HADMA
3. Degaannda dhibtu gaartey
4. ICRC, Bisha Cas iwm
5. Hay'daha horumarinta
6. Maamullada Maxalliga ah
7. Bulshada Rayadka ah
8. Dawladda dhexe
9. Ganacsatada

HADMA Ayaa qaadaneysaa kaalinta xiriirinta ee dhammaan wejiyada kala duwan ee maraynta Waxyeellada massibooyinka. Daneeyayaasha (stakeholders) kale waxa ay qaadan doonaan kaalimmada loo igmado.

### 3.2 HAWLAHA KA- HOR DHACDADA MASIIBADA

**3.2.1 Qorsheynta:** Waxaa la ansixin doonaa sharciga Maaraynta masiibooyinka (Puntland Disaster Management Act) kaas oo lagu maamuli doono maaraynta dhammaan hawlaha la xiriira wax ka qabashada massibooyinka.

**3.2.2 Diyaargarowga deg degga ah:** Qaabka ku soo boodidda **(Trigger Mechanism),** waxaa la samaynayaa qaab u darbanaan/diyaargarow degdeg ah oo lagu hubiyo in loo darban yahay digniinta, abaabulka deg degga ah, daadgureynta, samatabixinta iyo soo kabashada. Si taa loo gaarana waxaa la samaynayaa tijaabooyin joogto ah (trial exercises).

**3.2.3 Qiimaynta Halista iyo yareynta nuglaanta:** Waxaa masiibooyinka lagu samaynayaa qiimayn habaysan oo ay qaaddo ayna isku dubbariddo HADMA, iyada oo loo dhugyeelanayo dadka nugul iyo meelaha durugsan ee lagu nool yahay.

**3.2.4 Kaalinta Golayaasha degaannada:** Maadaama ay yihiin kuwa leh xiriirka dadka ugu dhow, kaalinta Golayaasha degaannada ee maaraynta waxyeellada masiibooyinka waa mid aad u weyn.

Waxa ay noqonayaan kuwa ugu horreeya ee jawaabta ka bixinaya xaaladaha deg degga ah. Waxaa culeyska la saaraya in la xoojiyo kartida hay'dahaas.

**3.2.5 Caddaynta Doorka iyo Kala qeexidda Jaranjarada amar bixinta:** Maadaama ay tahay saldhigga waxqabashada, HADMA waxa ay dejinaysaa dhammaan qaabka kala dambaynta hawlgallada inta lagu jiro meertada maaraynta waxyeellada masiibooyinka

**3.2.6 Xirriirinta:** Dawladda iyo degmooyinkuba waxa ay soo wargelinayaan HADMA inta aan wax hawl-gargaar ah la bilaabin, arrintaasina waxa ay yareyneysaa isdul fuulka iyo dayac ka yimaada wax ka qabashada.

**3.2.7 Xiriirka war kala helidda:** waxaa dedaal joogta ah loo gelidoonaa sidii loo heli lahaa qaab war kala helid ah oo la isku- hallayn karo. Sidoo kale waxaa la samayn doonaa hab kayd ah oo loo irkado haddii cillado ku yimaadaan isgaarsiinta jirta. Nidaamka ICT ama war isgaarsiinta ayaa loo adeegsanayaa digniinta hore ee masiibooyinka qaddinka ah.

**3.2.8 Diiwaan gelinta hantida:** Waxaa la diiwaan gelinayaa hantida ay haystaan daneeyayaashu dad iyo duunyoba ee loo adeegsanayo hawlaha waxyeellada masiibooyinka, diiwaangelintu waxa ay ka dhaceysaa heer qaran iyo heer degmo joogtana waa loo cusbooneysiinayaa..

**3.2.9 Xoojinta Kaabayaasha:** dedaal wadajir ah ayaa loo gelidoonaa hagaajinta waddooyinka, kaabadaha, kannaallada, guryaha dawladda iyo bulshada iyo saldhiyada korontada si ay u noqdaan kuwo masiibooyinka loo adkeysan karo. Dhammaan dhismayaasha cusub waxaa lagu dabbaqi doonaa tallaabooyin ka dhigi kara kuwa u adkeysta masiibooyinka ama looga sabatabixi karo. Arrimahaas waa in sharcigu ilaaliyaa fulintooda. Waxaa la joojinayaa ku xadgudubka degaannda loo aqoonsado in ay nugulka yihiin.

**3.2.10 Xarunta Hawlgallada deg degga ah:** Baraha hawlgallada degdegga ah ayaa laga samaynaya meelo cayiman ee heer qaran iyo heer degaanba oo laga hago hawlgallada.

**3.2.11 Ilaalinta Deegaanka:** Ilaalinta degaanku waa mid ka mid ah tallaabooyinka lagu dhimi karo khatarta masiibooyinka. Waxaa culeys la saari doonaa in la dhawro lana ilaaliyo nidaamka degaanka ama bey'ada (Ecosystem) iyadoo lala kaashanayo dadkenna iyo addunweynahaba.

## 3.3. HAWLAHA WEJIGA WAX QABADKA / JAWAABIDDA

**Ujeeddada Gargaaridda:** Hawlaha gargaarka waxaa loo dejinayaa qaab ay wax uga qabtaan baahida deg degga ah ee jirta, iyada oo si gaar ah loo tixgelinayo baahida ay qabaan dadka nugulka ah. HADMA waxa ay hubineysaa in gargaarku u dhaco si xaqsoor ah oo siman.

**3.3.1 Shaqaalaha gargaarka deg degga ah:** Waxaa la diiwaangelinayaa shaqaalaha u tababaran gargaarka deg degga ah, waxaana loo gudbinayaa xogtaas hay'adaha gargaarka ku hawlan.

**3.3.2 Cuntada iyo Gabbaadka:** waxaa gargaarka deg degga ah ugu horraynaya baahida cunto, gabbaadka iyo biyaha la cabbo iyada oo si gaar ah loo eegayo dhallaanka, waayeelka iwm.

**3.3.3 Caafimaadka iyo Faya-dhawrka:** si looga hortagga cudurrada faafa, waxaa la qaadayaa tallaabooyin lagu wasakhsaarayo biyaha. Masuuliyadda guud ee hawshaas waxaa yeelandoona Wasaaradda Caafikmaadka, NGOyada iyo UNka, waa la weydiisan karaa taageero dheeraad ah.

**3.3.4 Tacsiyaynta iyo la talinta dadka dhibaatadu gaartay:** Dawladda iyo ururrada bulshadu waxa ay waano-nafsiyeed iyo tacsi siin doonaan dadka la ildaran Naxdinta masiibada (post- disaster trauma) gaar ahaan carruurta iyo haweenka.

**3.3.5 Ammaanka:** Tabaabusho dhammaystiran ee ku habbon ayaa loo geli doonaa si loo sugo amniga alaabta loo wado gargaarka deg degga ah. Sidoo kale waxaa la sugayaa amniga xeryaha gargaarka waxaana loo adeegsanayaa dadka magaca ku leh bulshada dhexdeeda iyo shaqaalaha gargaarka.

**3.3.6 War kala helid:** si warka saxa ah la isu weydaarsado loogana hortago beenta iyo kutiri kuteenka, waxa ay HADMA mar walba soo saari doontaa war-qoraallo rasmi ah si dawladda iyo shacabkuba warka saxa ah u helaan.

**3.3.7 Qiimayn khasaare oo deg deg ah:** Iyada oo ay xiriirinayso hey'adda HADMA, ururrada caalamiga ah, maamullada degmooyinka iyo wasaaradaha ay khuseeyso wax ay samayn doonaan qiimeyn khasaare oo deg degg ah xitaa marka ay hawlaha gargaarku socdaan.

**3.3.8 U-gudbid Deg deg ah ee Soo Kabashada:** si sharafta aadami ee dadka masiibadu halakaysay aan loo dhaawicin waa in lagu dadaalaa in si deg deg ah loogu gudbo wejiga soo kabashada ee wax ka qabashada Masiibada.

## 3.4. WEJIGA SOO KABASHADA IYO DIB-U-DHISKA

**3.4.1 Qiimayn waxyeello oo faahfaahsan:** Wejigan waxaa lagu samaynayaa Qiimayn faahfaahsan waxyeelladii dhacday si loo cabbiro mudnaantana la kala siiyo dib-u-dhiska dhulkii dhibtu ku dhacday sida ugu dhakhso badan. Wasaaradaha ay khuseeyso ayaa qiimaynta qaybaha kala duwan iyo qorshaha waxqabadkaba waxa ay raaci doonaan qaab ay dejisey HADMA dabadeedna ay ansixisay Golaha Maaraynta Masiibooyinka Puntland (GMMP/PDMC) qorshaha dib-u-dhiska waa in markasta lagu tixgeliyaa kooxaha nugul iyo meelaha dhibtu kusoo noqnoqoto.

**3.4.2 Abaabulka hantida:** Ururinta hantida loo baahan yahay waxaa oggolaansheheeda bixinaya Golaha Maaraynta Masiibooyinka Puntland (dhinac kasta ha ka timaaddee). HADMA ayaa dejinaysa nidaamkii la isugu dubbaridi lahaa iyo xiriirinteeda si loo hubiyo in qoondayntu noqoto mid xaqsooran, loona abuuro iskaashi waxtar leh.

3.4.3 **Dib-u-dejinta Agoonta iyo Dumarka laga dhintay:** Agoomaha iyo Carmalka (Dumarka laga dhintay) wuxuu ku salaysnaan doonaa hab ay bulshadooda dhexdeeda wax loogu taro. In goobo gargaar loo furo waxa ay imaan kartaa haddii laga fursan waayo. Hawsha dib-u-dejinta agoonta iyo Durmarka laga dhintay waxaa bud dhige u noqonaya MOWDAFA iyo PASWE.

3.4.4 **Diiwaangelin:** diiwaangelinta wejiyada kala duwan ee maaraynta waxyeellada masiibooyinka waa arrin muhim ah waayo waxa ay xusuus u tahay wixii dhacay, sida loo maareeyey iyo khibraddii laga dhaxlay.

HADMA oo la kaashaneysaa hay'adaha kale ee ku lugta lahaa ayaa diiwaan u samayneysa wixii dhacay. Sidoo kale waxa ay HADMA maalgelinaysaa cilmi baaris iyo la talin la xiriirta maaraynta waxyellada masiibooyinka si tayada iyo waxtarka maaraynta loo hagaajiyo.

## Qaybta IV: SHURUUCDA IYO HAY'ADAHA

### 1. GOLAHA Gurmadka DEG DEGGA EE MAARAYNTA MASIIBOOYINKA (PDMC)

Golaha Maaraynta Waxyellada Maiibooyinka ayaa la samayn doonaa si ay siyaasadda guud u hagan Goluhu wuxuu awood u lahaanayaa inuu dib-u-eegid ama wax ka beddelid ku sameeyo siyaasadda maaraynta si ay ula jaan qaaddo baahida soo korodha dhanka maaraynta masiibooyinka. Golaha oo uu guddoomiyo Madaxweynuhu wuxuu kulankiisa caadiga ah yeelanayaa sannadkii laba jeer (Jannaayo /Luulyo). Hase yeeshee, hadday xaalad deg degg ahi soo kororto wuxuu goluhu yeelanayaa kulmmo aan caadi ahayn hadba sidii loogu baahdo. Goluhu wuxuu ka kooban yahay xubnaha soo socda:

| |
|---|
| ***Wasaarada Amniga, Arrimaha Gudaha, qorsheynta iyo Xiriirka Caalamiga, Caafimaadka, maaliyadda Hawlaha Guud iyo Guriyeynta, Degaanka, Xannaanada Xoolaha, Waxbarashada, MOWDAFA, Beeraha, Dekedaha iyo Gaadiidka Badda, HADMA iyo PSAWEN*** |

### 2.1. SHARCIYADDA SIYAASADDA


Siyaasaddan oo Golaha Wakiilladu ansixiyey, iyada saldhig u noqoneysa sharciyadda maaraynta masiibooyinka iyo arrimaha bini'aadmiga ee Puntland.

### 4.3 HAYKALKA SHARCI

Waxaa la soo saarayaa sharci haga hawlgallada xaaladda degdegga ah (Disaster Act) oo kala qeexayaa waajibaadka xubnaha ka hawlgelaya maaraynta waxyeellada masiibooyinka, Xeerkaas wuxuu qeexayaa:-

1. Qaab-dhismeedka Golaha Maaraynta Masiibooyinka (GMM) iyo qaab-dhismeedyadahay'adaha kale ee maaraynta waxyeellada masiibooyinka.
2. Awoodaha iyo xilalka HADMA
3. Dhaqaajinta qorshayaasha maaraynta waxyeellada masiibooyinka

## 4.4 QAABDHISMEEDKA MAARAYNTA MASIIBOOYINKA (Soo Jeedin)



### 4.4.1 HAYA'ADDA MAARAYNTA (HADMA)

HADMA waxa ay hoos tagtaa xafiiska madaxwaynaha. Waxa ay masuul ka tahay, Hogaaminta, Maaraynta, Isku dubaridida dhamaan hawlaha arrimaha bini'aadminimo iyo kuwa maaraynta waxyellada Musiibooyinka iyo xaaladaha deg deg ah ee ay keenaan, sidaa oo kale waa hay'ad ka shaqaysa dhinacyo badan. Hadaba Xilalka iyo masuuliyadda HADMA ee la xiriirta siyaasaddan waa kuwa soo socda:

- Fulinta hawlaha maalin laha ah ee dhammaan maaraynta waxyeellada masiibooyinka sida U diyaargarowga, Yaraynta waxyeellada, Ka jawaabista, Ugagsiga iyo ka soo ka bashada ee ku qeexan siyaasaddan iyo talooyinka kale ee hadba kasoo baxa Golaha Maaraynta Masiibooyinka Puntland (GMMP/PDMC).
- Dejinta qaabka digitaanka iyo la socodka masiibooyinka oo heer qaran ah oo wax ku ool ah.
- Hagidda dhamaan hawlaha maaraynta waxyeellada masiibooyinka iyo arrimaha bini'aadamka heer qaran/ heer gobol/ heer degmo iyo heer tuulo ee ka soconaya Puntland. Sida Hawlaha Ugagsiga, U diyaargarowga, Ka jawaabista iyo ka soo kabashada.

**Iyada oo raacaysa tusaalooyinka iyo talooyinka GMMP:**

- waxa ay HADMA maamulaysaa sanduuqa maaraynta masiibooyinka marka la sameeyo.
- Waxa ay isku dubbarideysa hawlaha daneeyayaasha kale ee lugta ku leh maaraynta masiibooyinka iyo arrimaha bini'aadamka ee ka soconaya Puntland
- Waxa ay dhiirrigelisaa korna u qaaddaysaa wada shaqaynta dhinacyada kala geddisan ee hawlaha ku jira, oo ay kula shaqeyso nidaam kalsooni abuuri kara.
- In ay horseed u noqoto ururinta tabarruca ka imanaya cidda dawladda ka baxsan;
- In ay taageerto fursadaha lagu hormarinayo tayada wax qabad ee daneeyayaasha maaraynta waxyeellada masiibooyinka;
- In ay daabacdo, Kormeerto isla markaasna kaydiso xogta iyo wararka maaraynta waxyeellada masiibooyinka una qaybiso qaybaha kale ee lugta ku leh.
- In ay samayso nidaam la socosho iyo qiimayn dhanka dejinta barnaamijyada iyo fulinta hawlaha maaraynta waxyeellada masiibooyinka.
- In ay kala kaashashato GMMP/PDMC dejinta habraacyada maaraynta hantida iyo kharaj bixinta ee hay'adaha ku hawlan maaraynta waxyeellada masiibooyinka.
- Waxay kormeer iyo qiimayn ku samaynaysaa dhamaan hawlaha waxka qabashada musiibooyinka, Xaaladaha deg deg ah iyo kuwa bini'aadamka ee ka soconaya Puntland xogtana waxay ugudbinaysaa Madaxwaynaha,

### 4.4.2 WAAXYAHA HADMA

HADMA waxa ay lahaaneysaa Shan waaxyood oo kala ah; Arrimaha Gargaarka Aadamiga, Qorsheynta iyo la socodka, Udarbanaanta Yareynta halista masiibada, gurmadka, Maamulka iyo Maaliyadda.

**i) Waaxda Arrimaha Gargaarka Aadamiga**

- Kormeerka, xiriirinta iyo ilaalaynta macaawinada ku timaadda gargaarka aadaminimo
- U qareemidda mashaaricda bini-aadaminimo ee Puntland
- Ilaalaynta iyo kormeeeridda gargaarka degdegga ah.
- Isku dubbaridka shirarka xiriirinta/ iskuduwidda ee ka dhexeya dawladda iyo hey'adaha caalamiga ah ee ku hawlan gargaarka bini-aadaminimo iyo hawlaha ka soo kabashada
- u soo gudbinta warbixin saddex-biloodle ah iyo mid sanadle ah Madaxweynaha Puntland ee hawlaha gargaarka aadaminimo ee dalka.
- dejinta shax muujinaysa shaqada hey'adaha ku hawlan gargaarka, hawlaha ay hayaan iyo meesha ay ka fulinayaan.

**ii) Waaxda Gurmadka**

Masuuliyadaha waaxdan waxa ay yihiin:

- Xog ururin, qiimayn iyo La socod joogto ah ee masiibooyinka
- Isku dubbaridka ka digidda qaddiman ( early warning system)
- Soo saaridda Wargeysyo iyo qoraallada ku ka-digidda qaddiman
- Gacan ku haynta saldhigga xogta (database) masiibooyinka
- Dhiirrigelinta war iyo khibrad isweydaarsiga qaybaha hawsha ku jira ama ka shaqeeya.
- Samayn daraasad istaraatiijiyadeed iyo talo siin dhinacyada hawlaha ku lugta leh.
- Fududaynta qorshaha iyo hirgelinta hawlaha gurmadka iy yaraynta khataraha marka hawluhu socdaan.
- Daba-galka kharajka baxa cidkasti ha bixisee si wax qabadka iyo hantida baxday la isugu miisaamo/dhellitiro

**iii) Waaxda Udarbanaanta/Diyaargarawga, Lasocodka iyo Qiimaynta**

- Lasocoshada, baaritaanka iyo qiimaynta xogta heerarka kala duwan ee masiibooyinka
- Qiimaynta waxtarka hawlgallada maaraynta wax ka qabashada masiibooyinka;
- Soo gudbinta warka iyo warbixinnada;
- Habaynta iyo isbarbardhigga xogta iyo kaydintooda;
- Qaadista daraasado la dabbaqo ee la xiriira maaraynta masiibooyinka, isbeddelka cimilada iyo degaanka.

- Samaynta qorshayaal horumrineed oo la xiriira wax ka qabashada waxyeellada masiibada oo qabyo ah (drafting).
- Ka digidda khatarta iyo la socoshada kaydka.

**iv) Waaxda Qorshaynta, Tabarrada iyo Awood siinta**

- Abuurista shaqaale tababaran oo habaysan;
- Taageeridda horumarinta aqoonta maaraynta waxyeellada masiibooyinka dhinaca waxbarashada dadban iyo tan tooska ah;
- Wacyigelin guud iyo baraarujin iyada oo kala kaashanaysa dawladda, saxaafadda, Ururrada Bulshada iyo hay'daha horumarinta;
- Fulinta tababarro ku haboon weijyada kala duwan ee maaraynta masiibooyinka.
- Samaynta baaritaan joogta ah oo ku saabsan aqoonta shaqaalaha ee maaraynta waxyeellada masiibooyinka;
- In ay dhirrigeliso, ku adkaysato asluubta wanaagasan marka la fulinayo hawlaha maaraynta masiibooyinka iyo gurmadkeeda.

**v) Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda**

- Dejinta Habraac Maamul iyo maaliyadeed oo ay yeelato HADMA;
- Lacag bixin aan dib u dhac yeelan;
- Hanta dhawr joogta ah
- Maamulka shaqada iyo shaqaalaha

### 4.4.3 Maamullada Maxalliga ah:

Maamullada maxalliga ahi waxa ay xiriiriyaan Dawladda dhexe, Gobollada iyo degmooyinka si hawlaha maaraynta waxyeellada masiibooyinku u noqoto mid wax ku ool ah. Si koobanna looga maamuli karo maamul hoose oo kaalintoodu tahay:

- Hubinta ka hortagga, fududaynta iyo u darbanaanta masiibooyinka oo loo sameeyo si waafaqsan siyaasadda iyo tusaaleynta;
- In ay ku biiriyaan HADMA talooyin la xiriira digniinaha, is-diyaarinta iwm;
- Xaqiijinta in saraakiisha masiibooyinka ee degmooyinku leeyihiin aqoontii loo baahnaa;
- Dejinta istataraatiijiyad samafal oo ku habboon degmo kasta iyagoo maanka ku haya daldaloollada jira;
- Isku xirka dawladaha hoose iyo dawladda dhexe si hawlaha mareynta waxyeellada masiibada ka horreeyaa, sidii ugu habbooneyd ugu dhacaan.
- Fududaynta tababarrda iyo rakibaadda qalabka gargaarka deg degga ah iyagoo la kaashanaya Hay'adaha kale ee maxalliga ah, NGOyada iyo ganacsatada;

- Ka qayb gelinta bulshada hannaanka, qorshaha iyo horumarinta;
- Hubinta xiriir la isku hallayn karo ee ka dhexeeya maraynta waxyeellada masiibada iyo qorshaynta hawlaha;
- Dib u eegidda iyo qiimaynta qorshayaasha;
- Hubinta in isgaarsiintu tahay mid habboon;
- Dayactirka qalabka si joogta ah

## QAYBTA V: DUMIDDA HANTIDA IYO ILAALINTA U QOOLLAANTA

### 5.1 MAALIYADDA

Si maaraynta waxyeellada masiibooyinka loogu helo maaliyad haqabtiran, waxa ay siyaasaddani ku talineysaa in maaraynta waxyeellada masiibooyinka loo sameeyo ugu ***yaraan laba sanduuq maaliyadeed***; mid heer Puntland ah iyo mid heer degmo ah.

- Siyaasaddani waxa ay soo jeedineysaa in miisaaniyad sannadeedka dawladda boqolkiiba 1% looga qoondeeyo HADMA si wax loogu qabto dadka masiibadu tabaalayso xilliga ku habbon laguna hayo xisaab xiran, laguna furo amar Madaxweyne.
- Sidoo kale, siyaasaddani waxa ay ku talineysaa in la sameeyo sanduuq heer degmo ah oo lagu maamulo maaraynta Masiibooyinka wax ka qabashada heer degmo, dawladduna maaliyadda qaar ka kabto markii wax dhacaan laguna furo soo jeedinta HADMA marka la isla qiro dhibta jirta. ***Siyaasaddanina waxa kale oo ay soo jeedineysaa in boqolkiiba 2% ugu yaraan dakhliga degmooyinka in sanduuqaas loo gooyo***

### I. Sanduuqa Maaraynta waxyeellada masiibooyinka Puntland

Siyaasaddani waxa ay soo jeedineysaa in la sameeyo sanduuq heer Puntland ah oo ay maamusho HADMA iyadoo waafajineysa shuruucda iyo qawaaniinta la dejiyey. Sanduuqan waxaa la isugu geynayaa biirada ku talogalka Wasaaradda Maaliyadda, tabarruca ganacsatada, shakhsiyaadka, Ururrada Rayadka ah iyo hay'daha caalamiga ahi kaalmada ay bixiya.

***Siyaasaddani waxa ay soo jeedineysaa in miisaaniyad sannadeedka dawladda 1% looga qoondeeyo wax ka qabashada dhacda Masiibada si HADMA ay ugu suurtagasho in ay markii wax dhacaanba loogu helo gurmad degdeg ah.***

### II. Sanduuqa heer degmo

Siyaasaddani waxa ay ku talineysaa in la sameeyo sanduuq heer degmo ah oo lagu maamulo maaraynta Masiibooyinka, dawladda hoosena maaliyadda ay qaar u leexiso.

***Siyaasaddani waxa ay soo jeedineysaa in 2% dakhliga degmada sanduuqaas loo gooyo laguna abbaaro wax ka qabashada dhibaatada markii ay dhacdo.***

### 5.2. SHAQAALE IYO AGAB

Diiwaan gelin iyo gacan ku hayn wax ku ool ah ayaa laga samaynayaa Xarunta HADMA iyo heer degmoba. Waxaa qiimayn lagu samaynayaa baahida tababbar ee ay qabaan dadka ka hawlgelaya maaraynta waxyeellada masiibooyinka si loo daboolo gol daloolooyinka xirfadeed

iyo kuwa khibradeedba. Sidoo kale waxa ay HADMA gacan ka geysaneysaa kor u qaadidda xirfadda ciidammada dhanka gurmadka waxyeellada Masiibooyinka.

Wasaaradda Waxbarashada waxaa laga taageeri doonaa in ay manhajka ku darto maaraynta waxyeellada masiibooyinka iyo isbeddelka cimilada si wacyiga guud ee bulshada kor loogu qaado.

Diwangelinta hantida qalabka iyo agabka kale waxaa loola jeedaa in la ogaado qalabka iyo awoodda kaabayaasha kale ee la haysto iyo meesha ay ku sugan yihiin. Tani waxa ay sahleysaa daad gureynta qalabka, dadka iyo in go'aan laga qaato daldaloollada jira sidii lagu buuxin lahaa.

## 5.3 ABBABULKA SAHAYDA IYO SAADKA

Maaddaama qalab iyo agab haqabtiran aan loo hayn maaraynta waxyeellada masiibooyinka, dhammaan qalabka la heli karo oo ay ku jiraan kuwa ay leeyihiin ciidammadu iyo bulshadu waa in lo diyaariyaa gurmadka degdegga ah ee masiibooyinka.

Sidoo kale waxa ay siyaasaddani soo jeedinaysaa in la sameeyo shuruud sharciyaysan ee lagu adeegsan karo qalabka iyo agabka gaarka loo leeyahay xilliga masiibooyinku DHACAAN

## 5.4 KAABAYAASHA

Waxa ay siyaasaddani soo jeedinaysaa:

a. In la sameeyo bar kayd oo la dhigo cunto iyo agabka kaleba si loogu adeegsado gurmadka wayeellada masiibooyinka.

b. In la dhiso/la dayactiro kaabayaasha horumarka sida suuqyada, dugsiyada, cusbataallada, biyaha iyo waddooyinka si gurmadka loogu adeegsado.

## 5.5 ISGAARSIINTA

In shirkadaha isgaarsiintu ay guramdka waxyeellada masiibooyinka u meeleyaan khadad isgaarsiin oo u gaar ah, kuwaasoo u furan shaqaale loo igmaday.

## QAYBTA VI: LA SOCODKA IYO QIIMAYNTA.

### I. LA SOCODKA BARNAAMIJKA MAARAYNTA WAYEELLLADA MASIIBOOYINKA

1. Dejinta nidaam ka digitaan qaddiman oo kala duwan oo ay yeeshaan masiibooyinka kala jaadka ah (abaaraha, daadadka, dabka. Duufaanta iwm):

- Iyadoo la dejinayo calaamado laysla waafaqay
- Kulammo , dib-u-eegid iyo falanqayn waqti leh.
- Diiwaan gelin xaaladaha iyo waxa ka dhasha.
- Daneeyayaasha oo si joogto ah warka loola wadaago.
- Qorsheyn maaliyadeed iyo gurmad isku dubba ridan.
- Dejinta nidaamka la socod-hawleed iyo ku dhaqankiisa.
- Dejin tusmo dib-u-eegid dhammaan meelaha mudnaanta la siiyey.
- Dhidbidda nidaam xog-ururin oo loo adeegsado maaraynta dhibta masiibooyinka.
- Dejin nidaam warbixin lagu siiyo heerarka kala korreeya ee maamulka.
- Samaynta hantidhawr bulshadeed (Social auditing), iyo baaritaanno lagu sameeyo masiibooyinku sida ay u dhaceen iyo sidii loogu hawlgalay.

### II: QIIMAYNTA BARNNAMIJKA MAARAYNTA WAYEELLLADA MASIIBOOYINKA

1. Dib-u-eegista iyo qiimaynta nidaamka digitaanka qaddiman

- Dib-u-eegis lix biloodle ah oo lagu eego habboonaanshaha digitaanka ee degsan.
- Waxaa dib-u-eegista lagu darayaa xaaladda caalamka iyo saamayta ay ku yeelan karto Puntland.
- Dib-u-eegis heer Soomaaliyeed iyo her IGAD ah.
- Qiimaynta barnaamijka maaraynta Waxyeellada Masiibooyinka
- Dib-u-eegis barnaamij sannadle ah oo heer qaran iyo heer gobol oo si qoto dheer arrinta loogu faaqido iyo soosaarid warbixin sannadeed
- Qiimayn dhexe 30 -36 bilood fulinta ka dib
- Qiimayn kama dambeys ah dhammaadka fulinta iyo samaynta istaratiijiyad cusub

## Qeexidda Masuuliyadda iyo Waajibaadka Shaqada Hey'adda HADMA (23 March 2006)

Iyada oo laga tilmaan qaadanayo aafooyinka is dabajoogga ahaa ee Puntland ku dhacay 2004tii oo ay ka mid ahayeen abaartii kartoomaley, roobabakii barafka lahaa ee xoolaha badan laayey iyo badgariirkii sunaamida ayaa dawladda Puntland waxa ay magacawday Guddiga Xalaadda degdegga ah, waxaana guddiga loo xilsaaray maraynta waxyeellada Masiibooyinka sida isdabajoogga ah u dhacay si ay ula falgalaan Hey'adaha Caalamiga ah ee gurmadka u yimi kuwaas oo ku hawlanaa gargaarka degdegga ee lagu sabata bixinaayey dadkii ku waxyeellobay masiibooyinka. In kasta oo lagu dadaalay xiriirinta iyo isku dubbaridka hawlaha gargaarka waxaa soo if baxay in Wasaarad kastaa ay gaar ahaanteeda u ordaysay shaqaduna ayan isku xirnayn, taasina waxa ay keentay isdulfuul aan loo baahnayn ee fulinta Mashaariicda, is-qabqabsi xagga awoodda maamulka iyo khasaare kharash.

Haddaba Markii la arkay kala daadsanaanta shaqada iyo isku xirnaanta la'aanta heykalka shaqo ee Dawladda waxaa lagama maarmaan noqotay in la alkumo hey'ad si gaar ah u qaabilsan dhamman arrimaha gargaarka Aadamiga iyo maaraynta waxyeellada masiibada. Waxaana la dhisay HADMA (2005). Hey'addas oo si toosa u hoos tagta Xafiiska Madaxweynaha Puntland, taas oo qaabilsana hawlaha xiriirinta iyo isku dubba ridka gargaarka aadaminimada.

**HADMA waxa ay tiirdhexaad u tahay dhammaan shaqooyinka hawlagallada gargaarka aadami iyo Maraynta Waxyeellada Masiibooyinka, waana hey'ad dawli ah oo madaxbannaan, una xilsaaran xiriirinta iyo hoggaminta arrimaha gargaarka aadaminimada, yaraynta iyo ka digidda khatarta masiibooyinka, kasoo kabashada iyo u adkaysiga/gadsiga waxyellada Masiibada.**

### a. Halkudhegga HADMA

Halku dhegga HADMA waa gacan sii hey'adaha arrimaha ku hawlan gargaarka adami si ay u gargaaraan bulshada nugulka ah ah ee Puntland, waxna uga taraan marxaladaha kala duwan ee wax ka qabashada Masiibooyinka

### b. Aragtida fog (vision)

"HADMA'yoolkeedu waa Puntland oo u diyaarsan una adkaysi leh masiibooyinka:

### c. Himilada (mission)

"HADMA' hadafkeedu waa u-hogaaminta Puntland dhanka u diyaar garowga xaaladaha deg dedegga ah iyo isku dubba ridka, kajawaabidda masiiba kastas".

### d. Masuuliyadda iyo waajibaadka Shaqada ee Hey'adda HADMA

Sida ku qeexan magaca hey'adda xilka HADMA wuxuu ka kooban yahay laba qaybood oo kala ah Hoggaaminta Gargaarka degdegga ah ee aadaminimo iyo Maaraynta waxyeellada Masiibooyinka, sharciyadda dhismhaheeduna waxaa saldhig u ah dekareetada Madaxweynaha ee soo baxday ee lambarkeedu yahay 19, soona baxday Maarso 2005. Waxaa waajibaadkeeda xilka loo kala qaaday laba qaybood oo kala ah:

A. Arrimaha Gargargaarka Adaminimo iyo
B. Maaraynta Waxyeellada Masiibooyinka:

## 1. Xilka Hey'adda ee Hawlaha Arrimaha Gargargaarka Adaminimo

- Kormeerka, xiriirinta iyo ilaalaynta macaawinada ku timaadda gargaarka aadaminimo
- U qareemidda mashaaricda bini-aadaminimo ee Puntland
- Ilaalaynta iyo kormeeeridda gargaarka degdegga ah.
- Isku dubbaridka shirarka xiriirinta/ iskuduwidda ee ka dhexeya dawladda iyo hey'adaha caalamiga ah ee ku hawlan gargaarka bini-aadaminimo iyo hawlaha ka soo kabashada
- u soo gudbinta warbixin saddex-biloodle ah iyo mid sanadle ah Madaxweynaha Puntland ee hawlaha gargaarka aadaminimo ee dalka.
- dejinta shax muujinaysa shaqada hey'adaha ku hawlan gargaarka, hawlaha ay hayaan iyo meesha ay ka fulinayaan.

## 2. Xilka Xarunta xog-isweydaarsiga iyo xiriirinta gargaarka

- Xarunta xallinta iyo xal u helidda khilaafadka (is-afgaranwaaga) bulshada Puntland iyo hey'adaha Gargaarka
- Xiriirinta shirarka kalastarrada ku hawlan arrimaha aadamiga iyo shir-qoraalkooda.
- Dhexdhexaadinta, bulshada wax loo qabanayo iyo hey'adaha
- Hagidda, hoggaaminta iyo talo siinta dhamman hey'adaha bah-wadaagta ku ah ama ka wada shaqaynaya gargaarka aadaminimo ee Puntland.
- Isku xiridda Xafiisyada Dawladda iyo Hey'adaha.
- U gudbinta iyo u-diyaarinta hey'adaha caalamiga ah sharuucda iyo hab-dhaqanka dawladda Puntland ee ku saabsan gargaarka aadaminnimo
- In la dhiso qaabka digniinta qaddiman, (Early Warning System (EWS))iyada oo laga kaashanayo hey'adaha, FSNAU, FEWSNET and SWALIM etc
- Soo bandhigidda baahida iyo meelaha aan wax laga qaban; Xaqiijinta in baahida si xaqsoor ku jiro loo muujiyo.
- Amar bixinta iyo kantaroolka hawlaha hey'adaha gargaarka Aadamiga mar kasta oo loo baahdo.
- In ay ka Codsato ama ka dalbato gargaar beesha calaamka iyada oo ka wakiil ah Dawladda Puntland.
- In ay ka hesho hey'adaha ama ururrada ku hawlan gargaarka adamiga warbixinta qorsha-sanadeedka miisaniyaddooda ee Puntland iyo halka ay marayaan hawlaha ay hayaan (annual allocation and Progress reports)

## 3. Xilalka Hey'adda ee Maaraynta Waxyeellada Masiibooyinka

- Ku dhawaaqidda xaaladda degdegga ah iyada oo ka wakiil ah dawladda Puntland
- In ay diyaariso qaylodhaan una gudbiso hey'adaha Caalamiga ah iyada oo u wakiil ah Dawladda marka ay muuqato xaalad daran.
- Sahaminta iyo ka warbixinta xaladda degdegga ah iyada oo la-kaashanaysa dhamman bah-wadaagta shaqada.
- Diyaarinta qorshaha gargaarka wax ka qabashada waxyeellada Masiibooyinka.
- Hoggaaminta iyo xiriirinta wax ka qabashada waxyeellada Masiibooyinka
- Soo bandhigidda meelaha aan wax laga qaban iyo ka ilaalinta isdulfuulka.

- Maamulidda iyo Maaraynta kharajka iyo kaydka ku talogalka lama filaanka ( to Manage contingencies and basic emergency stocks).
- Yaraynta waxyeellada Masiibooyinka, Yaraynta Khatarta, u gagsiga (u-adkaysi) iyo u-qareemidda marka wax dhacan ee heer kasta.
- Dejinta qorshaha u darbanaanta xaaladaha degdegga u dhaca.
- Is-waafajinta qorshayaasha sectarrada dalka iyo qorshaha gurmadka ee Puntland
- Muujinta iyo Maan-gelinta khatarta ugu badan ee kutimaadda dadkeenna, u-nugullaanta iyo awoodda la haysto.
- Maaraynta jawaabceelinta Masiibooyinka iyo diyaarinta qorshaha horumarinta ee looga gudbi karo.

Siyaasaddan waxa ay dhaqangal noqonaysaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo

Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo

Laguna soosaaro Faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland

Prof: Cabdiweli Maxamed Cali Gaas

Madaxweynaha Dawladda Puntland ee Soomaaliya.